

WARQADDA FOOMKA GAABAN EE OGGOLAANSHAHA EE DADKA
AAN KU HADAL INGIRIISIGA

WARQADDAN WAA INAY KU QORNAATAA LUQAD UU FAHMI KARO QOFKU

Oggolaanshaha in Laga qayb galo Cilmi baadhida

Waxaa lagu waydiinayaa inaad ka qayb gasho daraasada cilmi baadhida. Ka hor inta aanad go'aan ka gaadhin, baadhahu waa inuu marka koowaad ku siiyaa macluumaadka si kuu caawiyo inaad fahamto sababta aad doonayso inaad ugu jirto daraasada, iyo sababta aanad doonayn INAADAN ugu jirin daraasada.

Baadhahu waa inuu markaa ka dib kuu sheegaa wax ku saabsan ujeedooyinka, nidaamyada, iyo muddada cilmi baadhida, nidaamyo kasta oo tijaabo ah, khataro kasta oo macquula oo la saadaalin karo, faa'iidooyinka cilmi baadhida, nidaamyo kale oo mustaqbal ahaan faa'iido leh ama daawaynta, iyo sida qarsooiga loo joogtayn karo.

[Haddii cilmi baadhidu ay ku lugleedahay ururinta macluumaadka la aqoonsan karo ama noocyada muunada ah oo ay ku jiraan kuwa soo socda:]

Baadhayaashu sidoo kale waxay kuu sheegi doonaan sida macluumaadkaaga **[iyo/ama noocyada muunada]** loo isticmaali karo mustaqbalka ama lala wadaagayaa baadhayaasha kale.

Halka ay habboon tahay, baadhayaasha waa inay sidoo kale kuu sheegaan wax ku saabsan magdhow kasta oo la heli karo ama daawaynta caafimaadka haddii dhaawac uu dhaco, suuragal ahaanshaha khataraha la saadaalin karo, duruufaha marka baadhayaasha ay joojin karaan ka qayb galkaaga, kharashyo kasta oo lagugu darayo adiga, waxa dhacaya haddii aad go'aan ka gaadho inaad joojiso ka qayb galka, marka lagu sheegi doono wax ku saabsan natiijooyinka cusub kaas oo saamayn kara u diyaar ahaanshahaaga inaad ka qayb gasho, imisa qof ayaa ku jiri doona daraasada, iyo macluumaadka ku saabsan noocyada muunada la isticmaali doono iyo waxa ku dhici doono macluumaadka laga helo noocyada muunadaha la qaaday.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan cilmi baadhida ama haddii aad dareento in lagu dhaacaway, waxaad la xidhiidhi kartaa:

Magaca:

Telefoonka:

Haddii aad hayso su'aalo, walaacyo, ama cabashooyin ku saabsan xuquuqdaada sidii ka qayb galaha cilmi baadhida fadlan la xidhiidh xafiiska Ilaalinta Cilmi baadhida Adamaha, "Human Research Protection Office" lambarka 1-(800)-438-0445 ama iimayl hrpo@wusm.wustl.edu.

Ka qayb galkaaga cilmi baadhida khasab maaha, oo laguguma ciqaabi doono ama ma waayi doontid dheefaha haddii aad diido inaad ka qayb gasho ama go'aan ku gaadho inaad joojiso.

Sharaxa tijaabada caafimaadka waxaa laga heli karaa <http://www.ClinicalTrials.gov>, sida Sharciga Maraykanku u baahan yahay.

Websaydka kuma jiri doonto macluumaadka ku aqoonsan kara adiga. Ugu badnaan, Websaydka waxaa ka mid ahaan doono natiijooyinka oo kooban. Waxaad baadhi kartaa Websaydka wakhti kasta.

Haddii aad aqbasho inaad ka qayb gasho, waa in lagu siiyaa nuqul warqaddahan ah oo saxeehan oo taariikhaysan oo ku qoran luqad aad fahmayso iyu nuqulka warqadda ku qoran Ingiriisiga ee kooban (oggolaanshaha).

Saxeexida warqaddan macnaheedu waxa weeye in t dhammaan macluumaadka ka yimid warqadda Ingiriisiga kooban (oggolaanshaha) hadal ahaan lagu akhriyay, oo aad ka hadashay macluumaadka oo su'aalahaaga laga jawaabay, oo aad si an khasab ahayn u aqbashay inaad ka qayb gasho.

Magaca ka qayb galaha ee daabacan

SSaxeexa Ka qayb galaha

Taariikhda

Magaca Markhaatiga oo daabacan

Saxeexa Markhaatiga

Taariikhda

Ka qayb galaha:

Markhaatiga:

Qofka Helaya Oggolaanshaha:

Saxeexda LABBADADA Foomkan gaaban iyo Ta kooban ee Ingiriisiga (Warqadda Oggolaanshaha)

Saxeex KELIYA Ingiriisiga Kooban (Warqadda Oggolaanshaha)

KELIYA Foomkan Gaaban